



AFRICAN WOMEN'S CLINIC

(Kilnikada Caafimaadka Haweenka Africa)

the women's
the royal women's hospital
victoria australia

Yaa iman kara kilinikada?

Kilinikada (Bukaan socod eegtada) waxaa loogu talagalay haweenka da'kasta, dhalinyarada, kuwa uurka leh ama ka weyn, kuwaas oo soomaray gudniinka dheddiga (jarida dhaqanka) oo ay jeclaan lahaayeen inay ka hadlaan gudniinka iyo/ama dib-u-celinteeda.

Habraacan waxaa la yiraahdaa **tolid-la'aanta** inkastoo aanu u tixraac doono **dib-u-celinta** sababtoo ah tani waa sida haweenku doorbidayaan.

Waad heli kartaa dib-u-celin haddii aad uur leedahay, hase ahaatee waa in la sameeyaa ugu dambeyn laga joogo 34 toddobaad ee uurkaaga.

Kama samayno habraac qalliin kale ah rugtan caafimaadka.

Kilinikada waxaa la sameeyaa subax kasta dhaafid oo jimce ah

Sidaan kuu ilaalino

Kilinikada Caafimaadka Haweenka Afrika waa kilinik ay wadaan kalkaalisada oo ay ka shaqeeyaan kalkaaliyeyaasha caafimaadka ee haweenka iyo umulisoooyinka khibrad u leh siinta daryeelka haweenka la kulmay gudniinka dheddiga ama jarista dhaqanka. Kalkaalisada/umulisada kilinikada ayaa kaala hadli doonta arrimaha caafimaadkaaga iyo gudniinkaaga. Waxay sidoo kale kaala hadli doontaa wax ku saabsan habraacan, isbeddelka aad dareemi doonto ka dib markii habraaca la sameeyo iyo bogsoodka.

Kalkaalisadu/umulisada caafimaadka ayaa sidoo kale ku siin karta macluumaad iyo taageero la xiriirta arrimaha kale ee caafimaadka oo aad rabto inaad ka hadasho.

Shaqaalaha Barnaamijka Waxbarashada Xuquuqda Qoyska iyo Taranka (FARREP) ayaa diyaar u ah inuu kaa caawiyo ballamahaaga.

Haddii aad haysatid kaarka Medicare adeegu waa lacag la'aan. Haddii aadan haysan kaarka Medicareka, fadlan kala hadal shaqaalaha FARREP. Waxaad ka soo wici kartaa (03) 8345 3058.

Sameynta ballanta

Uma baahnid inuu ku soo gudbiyo dhaqtarka degaankaaga (GP) si aad u timaado kilinikada. Fadlan wac taleefanka (03) 8345 3037 ama 1800 442 007 (wicitaanada miyiga) si aad ballan u samaysato.

Haddii aad u baahato caawimaad si aad ballan u sameysato kala xiriir FARREP lambarka (03) 8345 3058.

GP-gaaga ayaa faakis ugu gudbin kara (03) 8345 3036.



Interpreter

Fadlan noo sheeg haddii aad u baahan tahay turjumaan marka aad ballanta sameysaneyso.

Waxaad heli doontaa saddex ballamood:

- Ballanta ugu horeysa - waannu kula hadli doonaa oo waxaannu ogaanaynaa taariikhda caafimaadkaaga
- Ballanta labaad - waxaan samayn doonaa dib-u-celinta
- Ballanta saddaxaad - waxaanu eegi doonaa waxaad dareemaysid iyo haddii dib-u-celintusi wacan u bogsanayso.

Xaaladaha qaarkood, dib-u-celinta waxaa lagu sameyn karaa ballantaada ugu horeysa.

Maxaa ka dhici doona ballamahayga?

Kalkaalisada/umulisada caafimaadka ayaa:

- Fiirin doonta gudniinkaaga si ay u eegto nooca dib-u-celinta aad u baahan tahay
- kaala hadli doonta arrimaha caafimaadka ee aad qabto
- haddii aad go'aansato inaad rabto dib-u-celinta waxaan ku siin karnaa macluumaadka anaga oo isticmaalayna sawirada haddii aad jeceshahay waxaan kaala hadli karnaa sida loo sameeyo
- kaala hadli doonaa isbeddelada jirkaaga ka dib dib-u-celinta iyo soo bogsoodka

- haddii aad qabto arrimaha kale ee caafimaadka waxaan kuu sheegi karnaa adeegyada kale iyo sida loola xiriiro
- waxaan ku arki doonaa afar todobaad ka dib habraaca si aad u aragto sida aad noqotay.

Shaqaalaha FARREP ayaa:

- taageera dhammaan haweenka ka socda dhaqamada gudniinka dhedigga looga dhaqmo
- caawiya si aad u hesho balantaada wayna kula joogi doontaa inta lagu jiro balantaada kalkaalisada
- kaa caawinaya waxyaabaha la taaban karo sida gaadiidka usocda ama kla socda isbitaalka, childcare-ka, turjumaanada iyo adeegyada kale
- waxay ku siiyaan macluumaad ku saabsan adeegyada muhiimka ah iyo sida loogala xiriiro, isbitaalka iyo bulshada dhexdeeda
- ku siinayaan macluumaad ku saabsan gudniinka iyo sharciga Victoria
- ku siinaya macluumaadka caafimaadka adiga iyo gabadhaada.

Faahfaahinta xiriirka

Shaqaalaha FARREP ayaa diyaar ah Isniinta ilaa Jimcaha, 9subaxii ilaa 5galabnimo

T: (03) 8345 3058

E: farrep.program@thewomens.org.au

F: (03) 8345 3053

Ama la xiriir shaqaalaha FARREP ee xarunta caafimaadka bulshada ee deegaankaaga.

Ka raadi website-keena internetka wixii macluumaad dheeraad ah:

www.thewomens.org.au/healthinformation